

Siyaasada ku aadan tubaakada ee iskuulka waxbarashada dadka waa weyn ee Uddevalla

Iskuulka waxbarashada dadka waa weyn waa in uu noqdaa goob shaqo oo nadiif ka ah isticmaalka iyo cabista tubaakada. Tubaako waxaa loola jeedaa wax walbo oo tubaako ku jirto ama ay qayb ka tahay.

Sida sigaarka, sigaarka elektarooniga ah, shiishada, beebka tubbaakada, sigaarka buuran iyo tubaakada cayriinka ah.

Waa qalad in sigaar lagu afuufo ama uu urkiisa dareemo qofka ku sugan gudaha iskuulka waxbarashada dadka waa weyn ama meelaha ka ag dhow.

Waa ka mamnuuc in sigaar lagu cabo ama tubaako lagu isticmaalo agagaarka wishka iskuulka iyo meelaha gawarida la dhigto.

Haddi uu wali jiro qof doonaya in uu sigaar cabo, waa in uu la tagaa Musikberget, halkaas waxaa yaalo meel sigaarka lagu damiyo iyo meel qashinka lagu rido.

